Waxabarashada farsamada Gaadiidka

Ma doonaysaa in aad shaqeysid inta aad ku jirtid dugsiga sare?
Ma doonaysaa in aad ka shaqeysid barnaamij horumar balaadhan kutiigsanaya marba marka ka danbeeysa islamarkaana horumar balaadhan hadafkiisu in uu tiigsado ah?
Ma doonaysaa in aad horumarbalaadhan iyo aqoon aad u sareeysa in aad sameysid, marka loo eego xiisaha aad u qabtid gaadiidada?
Ma doonaysaa in aad shaqo aad doonatid kadib marka aad waxbarashada dugsiga sare aad dhameysid?
Ma doonaysaa in aad baratid, waxna ka ogaatid su´aalooyinka maanta wax ku oolka, lagana hadlo in wax lagabedelo lagana qabto, kuna wajahan dabeecada.iwm.?
Haddaba waxbarashadan gaadiidku waa mid adiga ku gu haboon.

Waxbarashadan gaadiidka waxaad barandoontaa sida loo sameeyo gaadiidka iyo sida loo isticmaalo gaadiidka, iyadoo loo kala adeegsan doono hawlo kaladuwan.Waxaad tusaale ahaan aad noqonkartaa wade cagaf-cagaf ee lagu qaado alaabaha culus,dareewalka baabuurta shiidaalka,ama haddii ay jiraan waxkale oo aad adigu aad xiiseenaysid in aad ku shaqeysid.waxaad ka fikirtaa sida uu muhiim uu inooguyahay gaadiidku nolol maalmeedkeena, marka laga eego dhinac walba!waxaad hadaba ogsoonaataa in qaybahani uu yahay mid aad u balaadhan, lehna waxbarashooyin iyo takhasus aad ubadan oo kaladuwan.

Inta aad waxbarashada gaadiidka aad kujirtid wax aad is ku deyikareysaa in aad qaadatid leesanka baabuurta lagu wado, in kastoo ey ku xidhantahay marba waxbarashada aad ku jirtid waxa ay tahay.

In aad shaqeysid ama waxbarashadaada aad sii wadatid.

Haddii aad dooratid waxbarashadan gaadiidka waxa aad raad sankartaa shaqo, kadib marka aad dhamaysid waxbarshada dugsiga sare.shaqooyinka aad raadsankartid waxa uu ku xidhanyahay hadba waxa uu yahay takhasuskaagu.Haddii aad rabtidna waxbarashadaada waad siiwadankartaa, ilaa iyo heer jaamacadeedna waad sii wadan kartaa waxbarashadaada, ama waxaad gelikartaa iskuulada lagubarto xirfadaha.

Haddii aad ogtahay in aad waxbarasho heer jaamacadeed aad doonaysid in aad sii wadatid Waxaad weydiinkareysaa, kalan tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada (studie och yrkesvägledare)waxbarashada iyo casharada ah in aad haysatid si aad waxbarashadaada aad u wadatid.

Si kasta ha noqoto xiisaha aad u qabtid in aad ka shaqeysid gaadiidka, aqoontaadu waxa ay noqondoontaa waligeed mid marwalba sii kordhidoontoonto siina xoogeesandoonto inta aad weligaa aad nooshahay ee aad ku jirtid shaqada gaadidka. Sababtoo ah qaybtani waa qayb horumar kutalabsaneysa marwalba.

Shaqooyinka aad helikareysid.

Marka aad dhameeysatid waxbarashadan gaadiidka waxa aad raadsankartaa shaqooyinka kala ah sida, shaqooyinka geerashyada, bire toosiye,farsame yaqaanka baabuurta waaween, farsameyaqaanka basaska,farsame yaqaanka taayarada ama shaagaga,farsameyaqaanka mashiinada,farsameyaqaan,dareewalka alaabaha geeya meelo kala duwan,dareewalka wada baabuurta wiishashka wax lagu qaado, dareewal khaas ah,dareewalka keynta iyo dhirta, dareewalka qaada cagafka alaabaha culus lagu qaado, farsamo yaqaanka diyaaradaha.

Waxbarashadu waxa ay ka koobantay

Waxbarashadan gaadiidku waxa ay ka koobantahay casharo. Casharo qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsiga sare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo ugaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashada gaadiidka oo kaliya. Waxaa intaa sooraaca in ay jiran casharo kale oo aad adigu gaar u doorankartid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay 5 takhasusood oo kaladuwan.taas oo macnaheedu ay tahay ardayda dhamaan dhigata waxbarashadan gaadiidka ee kuna sugan dalkan iyo nawaaxigiisa waxa ay doorankaraan marba kii ay rabaan in ay ku takhasusaan.Waxaa laga yaabaa meelo qaarkood in ay jiraan takhasusooyin farabadan oo kala duwan. Kuwaas oo laga yaabo in ay adiga gaar ahaan kugu haboonyihiin. Waxaad weydiinkareysaa, kalana tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)

Takhasuska guud waxa uu ka mid ah.

- Farsameyaqaanka diyaaradaha- Waxa aytahay shaqadani haddii aad xiiseenaysid mid lagusameenayo diyaradaha dayactir iyo hagaajin, ama waxa aytahay waxbarashadan mid aad meelo farabadan aad kaga shaqeysankartid.
- Qalfoota baabuurta- Waxa aytahay shaqadani haddii aad xiiseenaysid mid aad dib u cusboonaysiinaysid dhaawaca ama jug soogaadhay baabuurta qolofta sare, ama aad qolof cusub oo baabuur aad sameendoontid.
- Mashiinada- iyo farsamo yaqaan baabuurta isjiitayaasha Waxa aytahay shaqadani haddii aad xiiseenaysid mid aad dayactir iyo sameeyn aad kusameynaysid baabuurta aad u waaweeyn, tusaale ahaan, basaska,iyo cagaf-cagafyada beeraha,ama haddii aad doonaysid in aad ka shaqeysid baabuurta yar-yar, mootooyinka, ama mashiinada.

- Farsamo yaqaanka baabuurta yar-yar- waxa ay tahay shaqadani haddii aad doonaysid in aad dayactir iyo cusboonaysiin aad doonaysid in aad ku sameysid baabuurta yar-yar.

- Baabuurta xamuulka-waxa ay tahay shaqadani haddii aad doonaysid in aad ka shaqeysid xamuulka.

Xidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid waxbarashada gaadiidka waxa aad xidhiidh la lahaan doontaa suuqa shaqada,waxa aad isku deyi kareysaa in aad shaqeysid. Waxaad kaloo aad heysataa ilaa iyo 15 isbuuc oo dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah (APU) Tababarkaana waxaa kuu diri doona iskuulkaaga isaga oo markaas ay wada shaqayn ay kadhaxeyso iskuulkaaga iyo goobaha shaqo ee u dhaw meesha aad degen tahay.Waxaanad xidhiidh aad la lahaan doontaa shirkadaha waa-ween iyo kuwa yar-yar.Waana habka ugu wanaagsan ee aad dad ku barankartid, xidhiina aad ku yeelan kartid.xidhiidh kaas oo aad markale aad kaga faa ideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqo raadso mustaqbalka.haddii aad doonaysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada meel aan aheen Swiidhen, way surtogal noqon kartaa.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Shaqooyinka gaadiidku aad ayey u fursad fiicanyihiin in shaqo aad ku heshid, waliba si toos ah kadib marka aad dugsiga sare aad dhameysid. In ay shaqo helitaanku kugu adkaato ama aad si fudud aad u heshid waxa ay ku xidhantay hadba waxa aad baratay iyo takhasuskaaka waxa uu yahay.inta shaqo ee la helikaro waxa ay hadba ay ku xidhantahay sida uu yahay horumarka deegaankaaga. Laakiin tusaale ahaan haddii aynu u sooqaadano sanadahandanbe shaqooyinka gaadiidka waa-weeyn aad ayaa shaqo loogu helaa. Laakiinse shaqooyinka wax soosaarka warshadaha aad ayey yaraadeen, dadfarabadana waxaa ku dhacay shaqo la´aan.

Aad ayaa loogu baahanyahay dad aqoon buuxda u leh, bartayna tamarta. Dadkeena bini aadanka ahi waxaynu u baahanahay tamaro, islamarkaana waa in wax laga bedeela tamaradii hore u jirijiray. Haddii aad shaqo aad ku heshay kadib marka aad ka qalinjabisid waxbarashada tamarta ah, wax ay haddaba ay ku xidhantahay hadba takhasuska aad qaadatay wax uu yahay, ama haddii aad doontid waxbarashadaada waad sii wadan kartaa.tusaale ahaan haddii aad doonaysid in aad ku shaqeysi farsamo yaqaanka biraha, markaa waxaa suurtoobikarta in aad shaqo aad heshid kadib marka aad dugsiga sare aad kabaxdid.laakinse haddii aad noqotid injineer ama farsamayaqaan aqoon jaamacadeed leh waxaad u baahantahay in aad waxbarashadaada aad sii wadatid ilaa heer jaamacadeed, kadibna shaqooyin aayaad si fudud u helidoontaa.